# Ilaa xad intee le'eg ayaa xuquuqda galmada ee dhalinyarada soo galootiga ah looga fuliyaa dalka iswiidhan?

## GUNDHIGA IYO QAABKA

Xuquuqda galmadu waxay ka mid tahay xuquuqda aadahanaha. Ujeedada daraasadan ayaa ahayd in lagu qeexo heerka ay gaarsiisantahay xuquuqda galmada ay helaan dhanlinyarada soo galootiga ah ee dalka iswiidhan.

### Daraasadu waxay ka koobantahay shan qaybod ee xuquuqda galmada.

1) Xaq u lahaanshaha helida daryeel caafimaad ee galmada iyo taranka.
2) Xaq u lahaanshaha helida macluumaadka iyo aqoonta la xariirta galmada iyo sido kale xuquuqda galmada iyo caafimaadka taranka.
3) Xaq u lahaanshaha jirkaaga oo ka madaxbanaan qasab iyo hadgudub.
4) Xaq u lahaanshaha go'aan xor ah ee jinsi iyo xiriirkisa galmada.
5) Xaq u lahaanshaha noolol galmo oo badbaado iyo qanaco leh ka madaxbanaan cuqdad iyo takoor.

Xuquuqahan waxa lagama maarmaan u yihiin in la helo xuquuqaha ugu macqulsan ee caafimaadka galmada.


Natiijooyinku waxay ku saleysanyihiin jawaabo ay bixiyeen 1739 dhalinyaro muhaajiriin ah ee da'doodu u dhaheyso 16 jir ilaa 29 jir.Xogta waxaa la soo ururiyey sanadka 2018 iyadoo dadka loo dira emailo, loo adeegsaday baraha bulshada iyo booqasho loogu tagay iskuulada iyo meelaha kale. Dhalinyaradaasi waa kuwa iswiidhan yimid kana yimid wadamo ka baxsan midowga yurub, Waqooyiga Ameerika ama Ustaraaliya iyadoon loo eegin muddada ay joogen iyo sababaha ay ugu soo haajireen.

## NATIIJOO

Natiijada deraasadu waxa muujinaysaa in ah hooseeyso xuquuqda galmada dadka nina aheyn ee naagna aheyn, dadka ku sifeysan LGBTQ-ga, kuwo sugayaa ogolaanshaha dal kujooga ah iyo kuwa ku dhashay koonfurta Aasiya ee kana hooseeyan kooxaha kale. Kooxdan waxay ku warameen caafimaad galmo oo wanaagsan ka yare hooseysa kooxaha kale islamarkaana ka gaabsadeen inay raadsadaan daryeel caafimaad si ka hooseysa marka loola barbar dhigo kooxaha kale.

Ka qeygalayaasha badandkoodu waxay caafimaadkooda galmada ku qiimeeyen mid wanaagsan oo ayna ku qanacsanyihiin noolashooda galmada. Hase ahaate waxaa 6% ku qiimeeyay caafimaadkooda galmada mid liita ama aad u liita halka 12% ay sheegen inaysan ku qanacsaneyn noolashooda galmada (jaantus. 1)

Badi dadka raadsaday daryeelka caafimaad ee galmada iyo taranka ayaa ku qanacay daryeelka ay heleen. Haseyeeshe, 17,4% kaqeybgalayaashu waxay sheegeen inay ka gaabsadeen inay raadsadaan daryeel caafimaad inkasto ay dareemaayeen  inay u baahnaayeen.




Heterosexual:Galmoo ahaan soo jiidasho u leh jinsiga kale, tusale sida nin ay soo jiidato naag ama naagta nin soo jiito).

LGBQA: waa erey loo soo gaabiyo lesbian, gay, bisexual, transgender iyo queer. Ereyadan waxaa loo isticmaalaa in lagu sharaxo nooca qofka ee jinsiyeed ama aqoonsigiisa jinsi.

In kudhow seddex meelood meel dadka ka qeybgalay (38%) ma aysan garaneyn halka laga helo macalumaadka ku saabsan xaquuqda caafimaadka galmada iyo taranka, halka 21,4% ay ku warameen inaysan garaneynin meesha laga helo caawinta ka hortaga uurka.

Afar meelood meel ka qaybgalayaashu (25%) waxa loo geestay rabshado galmo, raggu waa 26% marka loo eego dumarka 21%. Si kastaba hanoqotee, dhibanayaasha badankoodu waxay ka gaabsadeen inay ka dacwoodaan ama cid ogeysiiyaan.

Ka qaybagalayaasha qaarkood (13%) waxay dareemeen inay xadidaad kala kulmaan xubnaha qoyskooda ama dadka isku dalka yihiin marka ay timaado cidda ay la sameyn karaan xriirka dhow.

## GABAGABO

Ka qeybgalayaasha badidood waxay sheegn caafimaad wanaagsan ee galmada, inkasto ay jireen kooxo arrinta u nugul. Macaalumaadka hada la haya ee ku saabsan xuquuqda galmada, sinnaanta jinsiga, shuruucda ilaalinayaa xuquuqda galmada iyo adeegyada laga helo iswiidhan in loola kaashadaa iskuulaadka iyo ururada muhaajiriinta. Kooxaha nugul waa in ay helan fiiro gaar ah iyo baahidooda ay u baahantahay in la tixgeliyo marka la qorsheynayo iyo la hirgalinayo iskudaygaas.

*Xaashi xaqiiqedan waxay ku saleysantahaty maqaalkan hoose: ” To what extent are young migrants’ sexual rights being fulfilled in Sweden? A cross sectional study” by Baroudi, M. Hurtig, A-K. Goicolea, I. San Sebastian, M. Jonzon, R. Nkulu-Kalengayi, F.